

OFFICIAL

Dadka degan
12 Sutton Street
WAQOYIGA (NORTH) MELBOURNE

Mudanaha/Marwada guriga degan

Waxaan qoraalkan kuugu soo qoraynaa in aan kula socodsiino halka ay marayaan howlihii Guryo Dhisida ee Homes Victoria iyo barnaamijka dib u dhiska saraha dhaadheer.

Marxaladdii xigtay ee barnaamijka ayaa hadda ka socota 7 goobood oo cusub. Taasi micnaheedu waxay tahay inay hada meel fiican noo marayaan dhisida aan 9 xaafadood uga dhiseyno guryo loogu talagalay dadka meesha degan hada iyo kuwa mustaqbalka soo degi doonaba guryahaas oo noqon doona kuwo ka fiican, ka amni wanaagsan iyo kana raaxo badan guryihii hore.

Warka maanta la shaaciyay wuxuu saameyn doonaa saraha dhaadheer ee ku yaal xaafadaada inagoona si joogto ah ula soo xiriiri doona dadka degan guryahaas. **Wax saamayn ah kuma yeelanayso dhismaha aad degan tahay ama gurigaaga.**

Waxyaabaha maanta lagu dhawaaqay?

Maanta, waxaan dadka guryaha degan kala hadalnay dib u dhiska lagu sameynayo dhismayaashan:

- 25 iyo 27 King Street, Prahran
- 150 Victoria Avenue, Albert Park
- 150 Inkerman Street, St Kilda
- 159 Melrose Street, Waqooyiga Melbourne
- 29 Crown Street, Flemington
- 94 Ormond Street, Kensington

Laga bilaabo bisha Luulyo 2026 ilaa bisha Febraayo 2028, Waxaan si dhow ula shaqeyn doonnaa qoysaskan si aan uga caawinno inay u guuraan guri ku habboon inta aan ka bixinayno guryo ka fiican kana tiro badan kuwii hore.

Waxaan guryo cusub ka dhiseynaa meel goobta ka ag dhow

Guryo cusub oo tayo leh ayaa durbaba laga bilaabay in laga dhiso meel goobta ka ag dhow si ay uga taageeraan dadka meesha degan fursadaha dib-u-dejinta. Waxaa la filayaa in la dhammaystiro sanadkan waxaana ka mid ah:

- Essex Street, Prahran
- Barak Beacon, Port Melbourne
- Simmons Street, South Yarra
- Holland Court, Flemington

In guryahan la qaboojiyo lana kululeeyo waa ay ka sahlanaan doonaan kuwii hore, dadka ay ku adag tahay dhaqdhaqaaqana way u fududaan doontaa, waxay kaloo lahaan doonaan amni aad u sarreeya, iftiin iyo hawo ay guyaha helayaan intaasna waxaa usii dheer inay leeyihiin balakoono iyo qolal kuu gaar ah oo dharka lagu dhaqdo.

Xaafadaada dhexdeeda

Waxaan taageereynaa qoysas tiradoodu yar tahay oo ku haray 33 Alfred Street si ay loo dhameystiro raritaankooda. Waxaan sidoo kale qadarin doonaa ra'yiga dadka deegaanka ee ku saabsan naqshadaha guryaha cusub iyo xarumaha bulshada. Aragtida fog ee aanu leenahay waa guryo cusub oo tayo leh oo ku yaal xaafad si fiican loo nashqadeeyey iyo xaafado si fiican iskugu wada xiran.

Xog ku saabsan barnaamijka dib-u-dhiska

Saraha dhaadheer ee Melbourne xilliyo hore laga dhisay waxaa lagu beddeli doonaa guryo cusub oo buuxiya heerarka casriga ah ee raaxada, gelitaanka, iyo koronto dhaqaaleynta. Marka dib loo dayactiro dhismeyaalkan, waxaan xaqiijinaynaa in dadka degan guryahaas ay ku noolaan karaan guryo ammaan ah, raaxo leh, oo ku habboon baahidooda hadda taagan iyo tan mustaqbalkaba.

Ma jiri doonto dib-u-dejin loo sameyn doono dadka degan saraha dhaadheer oo bilaaban doonta bisha Janaayo 2028 ka hor.

Nagu xirnoow oo la soco wixii soo kordho

Gurigaaga qayb kama aha howlaha dib loogu dayactirayo saraha dhaadheer, laakiin waxa laga yaabaa inaad aragto isbedelo ka dhacaya xaafadaada. Waan kula soo socod siin doonaa wixii ku soo kordha marxalad kasta oo mashruuca ah.

Waxa kale oo aad booqan kartaa websaydkeena homes.vic.gov.au si aad u aragto waxa howlaha aaggaaga ka socda aadna isku diiwaan geliso si aad u hesho wixii war u dambeeyay ee soo kordhay.

Mahadsanid

Simon Newport

Madaxa Fulinta

ee Homes Victoria

28/01/2026

search **homes victoria**



homes.vic.gov.au

